


KAHORTAGGA SILCINTA IYO FADUULINTA

TILAABOORYINKA UGU HOREEYA



Waxaa soosaaray:
Xafiiska Adeega ee Maxkamadaha
PO Box 4820
Portland, Maine 04112-4820
<http://www.courts.maine.gov>

Bisha Maarch 2015

SOMALI

FAAHFAAHIN

Shaqsi Lala Sheekeysto:

- Dad hadda ama mar horexiriir is shukaansi ah lahaa

Laga Dacwoode:

- Qofka aad rabtid in laga hortago dhibkiisa

Qaangaar Baahane ah:

- Waa qof qaangaar ah oo qaba jirro madaxa ama jidhka oo dhimaysa kartidiisa uu ugu filaan karo baahidiisa maalmeedka ah.

Qoys Balaaran:

- Ehel iskugu ah jiidh, ama guur ama isasoo korsi

Qoyska ama Dadka Guriga Wada Dagan:

- Qofka aad hada ama mar hore is qabteen ama wada noolaydeen
- Waalidiinta cunug is la dhalay
- Shaqsiyaasha hada ama marhore isla daganaa
- Dad gogolwadaaga
- Dad qaangaar ah oo guri kuwada nool oo jiidhwadaaga ama is qaba; ama
- Ilmo yaryar oo uu dhalay qaangaar guriga kunool

Qaangaarka kala Dhiman:

- Qof kasta oo miyrkiisa iyo jidhkiisa wax u dhimanyihiin oo gaadhsiisan heer uu qofkaasi uusan gudbinkarin ama qaadan karin goaamo la xiriira naftiisa.

Dacwoqabe

- Qofka maxkamada ka bilaaba dacwo is badbaadis ah

Dabagur

- Waxaa kamid ah laakiin ayna kusoo koobnayn sidan soo socota oo dhacda laba jeer ama kabadan; ilaalis, faragalintani, faraxumayn ama uhanjabis ku dhaliya dacwad qabaha inuu:
 - Inuu ama inay kutimaad sugnaanla'aan xun ama walwal farabadan
 - Inuu ama inay kacabsado/to dhaawac ama dhimasho soo gaarta jidhkiisa ama jidhkeeda, ama xayawaan kiisa / keeda ama shaqsi qaraaboyihiin
 - Cabsiin jabab ama burbur ama qashqashaad hantiyeed.

Qofka daryeelaha oon lacagtiisa lasiin:

- Daryeele isagu doorta inuu ufidiyo ashtakoodaha daryeel buuxa, mid wakhti kooban, mid marmarka qaarkood ah isagoo daryeelka kubixinaya guriga ashtakoodaha ama uu ufidiyo daryeel shaqsiyeed taasoo lamida sida uu kuu daryeelilahaa qoyskaaga qof kamid ah.

KAHORTAGGA SILCINTA

Ashtakoodahu wuxuu noqonkaraa:

- Qof qaangaar ah;
- Qof qaangaar ah oo uhadlaya kana masuul ah cunug yar;
- Cunug madax banaan, amaba;
- Masuul sharciyeedka qaangaar aan is maamuli karin.

Wada Xiriirka Waajibka ah

Qofka ashtakoodaha ah iyo kan laga ashtakoonayo waa inay sidan soo socota wax isugu yihiin, kaliya marka laga reebo in lagu xoogay ama lagu raadguray

- Qoys ama shaqsi gurigaaga kamid ah;
- Qof aad is shukaansataan; ama
- Ashtakoodaha waa 60 sano jir ama kawayn, ama qaangaar an isku filayn iyo laga ashtakoodaha oo ay qaraabo yihiin kan ashtakoonaya ama daryeele an lacag lasiin.

Xaaladaha Kalifaya in la Dalban Karo Kahortagga Silcinta

Silcintu

- Waa isku day ama gaysasho dhaawaca jidhka ama weerar gacanta ah;
- Waa isku day amaba cabsigalin qof kale ama dhaawacid:
- In loo diido qofku inuu qabsado wuxu xaq uleeyahay, in lagu qasbo, in loogu hanjabo, lagu cabsiiyo, qofku inuu sameeyo wax uu dooran karo inuusan samayn
- Iyadoo sijoogto ah looga xanibo qofka inuu dhaqdhaqaaq sameeyo
- In loogu cagajugleeyo dambi weerar

Kufsi: Xiriir ama ficil galmo ah oo yimaada iyadoon ogolaansho cad laga helin cida lala wadaagayo, sida ku cad 17-A.M.R.S Qaybta 11.

Dabagal: Macnaha dabagal ka fiiri qaybta faahfaahin.

KAHORTAGGA FADUULINTA

Ashtakooduhu wuxuu noqon karaa

- Qof qaangaar ah;
- Qof qaangaar ah oo uhadlaya kana masuul ah cunug yar;
- Cunug madax banaan;
- Masuul sharciyeedka qof aan is maamuli karin, amaba;
- Ganacsi.

Xaaladaha keeni kara in la dalbado Kahortagga Faduulinta

Si loo dalbado looma baahna in xiriir udhexeeyo dacwoqabaha iyo lagadacwoodaha.

Faduulintu waxay tahay marka ay sadex fal amaba ka badan oo ah cabsigalin, iskudhac, gacantoo la qaado ama lagu hanjabo in la qaadi doono. Fal kaliya ayaa loo baahan yahay marka ay faduulintu keenayso sharci jabin sida: ka caawin amaba ku boorrin isdil, weerar, cabsigalin, argagaxgalis, dhaqan xumo, ku xadgudub wixii khaaska ah, afduub, in ogaan qof kale naftiisa khatar la galiyo, in burbur loo gaysto hanti qof kale, faduulin, dab la dhaliyo oo dhibaato u gaysta hanti, ugu dambayn in la fara galiyo xaqa distuuriga ah ama xaqa bulshada ee qof kale.

Digniin Joojinta Faduulinta

Kahor inta anu dalban dacwad kahortaga faduulinta waa inuu dacwoqabugu kaqaataa police-ka digniin ku socota laga-dacwoodaha si uu usoo afjaro faduulinta. Nuskhad digniintaasahi waa inay lasocotaa dacwada.

Dacwo-qabaha loogama baahna inuu haysto digniinta police ee ku socota laga-dacwoodaha haddii:

- Faduulintu hadii ay la xiriirto gacan iskuqaadka qoyska, gacan iskuqaad laba is shukaansada, faraxumaynta ama dabagur;
- Dacwo-qabaha oo layimaada jawaab caqli gal ah sobobta uusan ugu digayn laga-dacwoodaha; ama
- Faduulintu waxay la xiriirtaa sharci jabinta sida: ka caawin amaba ku boorrin isdil, weerar, cabsigalin, argagaxgalis, dhaqan xumo, kuxad gudub wixii khaaska ah, afduub, in ogaan qof kale naftiisa khatar la galiyo, in burbur loo gaysto hanti qof kale, faduulin, hanti gubis, ugu dambayn in la fara galiyo xaqadistuuriga ah ama xaqa bulshada ee qof kale.

KA HORTAGGA SILCINTA OO LABARBAR DHIGAY KAHORTAGGA FADUULINTA

Hoos waxaa ku qoran farqiga udhexeeya Kahortagga Silcinta iyo Faduulinta

	Silcinta	Faduulinta
Ashtakada inta aadan buuxsan ama dalban kahor	Sharci fuliyayaasha waajib kuma ahan inay udigaan lagadacwoodaha si uu ujoojiyo silcinta 19-A.M.R.S. §4005	Sharci fuliyayaashu waa inay udigaan lagadacwoodaha si uu ujoojiyo faduulinta (inta badan). Digniintaas waxa la dhahaa Digniin Joojinta faduulinta 5M.R.S. §4653 17-A.M.R.S. §506-A
Dacwobilaabe	Ganacsi masoo dalban karo dacwo ah kahortagga silcinta 19-A.M.R.S. §4002 & 4005	Ganacsi wuu dalban karaa kahortagga faduulinta 5 M.R.S §4653(1)
Wajibitaanka xiriirka	Xiriir ayaa waajib ah marka laga reebo in lagu kufsan gaaray ama lagu raadguray amaba dacwoqabaha da'diisutahay 60 ama ka wayn, ama qaangaar baahan ama isku filayn oo uu yahaylaga-dacwooduhu cidii daryeelka siinaysay iyadoon lacag lagu siinayn. 19-A.M.R.S. §4005	Wax wada xiriir ah waajib ma ahan 5 M.R.S. §4651
Qiimaha	Waxba. AO - JB-05-26	\$30 doolar waaye, marka laga reebo jiritaanka ee dayn kusaabsan kufsi, raadguris ama isdagaalka qoyska ama ay maxkamadu ka saamaxdo sobobta oo ah dacwoqabuhu oon awoodin AO-JB-05-26 M.R.Civ. P. 91
Mudada	Ilaa 2 sanadood. 19-A.R.S. §4007	Ilaa 1 sano. 5 M.R.S §4655(2)
Hubka larido	Waxay kaxarimi kartaa inuu hubka larido ama khatar ah qaato qofka lagadacwoonayo. 19-A.M.R.S §4007	Mararka qaarkood waxa dhici karta in xarrimo qofka laga dacwoonayo inuu haysto hubka dhaca 15 M.R.S. §393

Ilaha loogu talagalay dacwoqabaha iyo laga-dacwoodaha:

**Ururka Gobolka Maine ee Adeega Qareenada
(Maine State Bar Association's Lawyer Referral Services)**

Waxay u ogoshahay qof walba inuu la tashado qareen.
Ka dib marka uu bixiyo qofku \$25 waxa loo ogalyahay 30 midhidda oo uu kula kulmo qareen
(intabadan khadka telephoneka).
1-800-860-1460
<http://mainebar.org/lawyer-referral>
lrs@mainebar.org

**Isbahaysiga Maine ee Dabarjarka Rabshadaha Qoyska
(Maine Coalition to End Domestic Violence)**

Waxay u fidisaa cawimaad iyo khayraad naafada rabshadaha qoyska.
Is bahaysigani waxa laga helaa khayraad si gaar ah uga caawiya dacwoqabayasha arrimaha kahortagga.
24-saacadood khad telephone oo sir ah:
1-866-834-4357
TTY: 1-800-437-1220
<http://mcedv.org>

**Isbahaysiga Maine ee Kahortaga Kufsiga
(Maine Coalition Against Sexual Assault)**

Waxa laga helaa cawimo iyo khayraad la xiriira kufsiga.
24-saacadood khar telephone oo sir ah:
1-800-871-7741
TTY: 1-888-458-5599
<http://mecasa.org>

**KARRANIGA MAXKAMADU KUMA SIIN KARO TALOYIN SHARCIYA AMA WAXAAD
KU BUUXINAYSO FOOMKA MAXKAMADA**

**Halkan ayaa la helaa foomamka: http://courts.maine.gov/fees_forms/forms
ama goobaha maxakamaduhu ku yaalaan.**